# Waan Weydiinnaa Sababtoo ah Waanu Daneynaa

Fred Hutch Cancer Center

Fred Hutch waxaa ka go'an iney bixiso daryeel tayo sare leh oo loo dhan yahay, la heli karo oo loo siman yahay dhammaan bukaannadayada. Tani waa sababta aan adiga iyo qof kasta oo aan daryeelno u weydiino su'aalo ku saabsan sinjigaaga, luqaddaada, aqoonsiga jinsiga iyo macluumaadka kale ee gaarka ah.

Macluumaadkani waxa uu naga caawinayaa in aanu si fiican kuu barano oo aanu buuxino baahiyahaaga daryeel caafimaad. Waxay kaloo naga caawinaysaa inaan wanaajino khibradda daryeelka ee dhammaan bukaannadayada.

Macluumaadkaagu waa qarsoodi waxaana ilaalinaya sharciga.

Ka jawaabista su'aalaha waa doorashadaada. Uma baahnid inaad haddii aadan rabin.

Waan weydiinaa sababtoo ah waanu danaynaa.

## Su'aalaha inta badan la isweydiiyo

**S: Macluumaadkee ayaad weydiin doontaa?**

**J:** Waxaan kaa codsanaynaa:

- **Jinsiyada:** Koox dad ah oo wadaaga sifooyinka jireed, sida midabka maqaarka. Waxa kale oo laga yaabaa inay wadaagaan aqoonsiyo bulsho ama dhaqameed oo isku mid ah. Waxaa jira kooxo isir ah oo badan waxaana laga yaabaa in qofku ka tirsan yahay ama loo yaqaan in ka badan hal koox. Tusaale: Aasiyaan
- **Koox qowmiyad:** Koox dad ah oo wadaaga dhaqan (caqiido, qiyam iyo dabeecad), af, diin, abtirsiinyo ama astaamo kale oo inta badan jiilba jiilka kale u gudbiyo. Tusaale: "Ruush" ama "Ethiopian"
- **Qowmiyadda:** Dadka Isbaanishka, Latino/a/x/e iyo/ama Isbaanishka ka soo jeeda. Koox qawmiyad gaar ah oo laga yaabo inay dadku ka soo jeedaan Costa Rica, Cuba, Puerto Rico, Koonfurta ama Bartamaha Ameerika iyo/ama isir kale oo Isbaanish ah.
- **Luuqadda:** Habka la door biday mid jeclaan lahaa in ay iskula xiriiraan oo ay is muujiyaan. Tusaale ahaan: Luqadda aasaasiga ah ee qofku, ama luqad kale oo uu si fiican ugu hadlo ama door bidayo in lagu wada xidhiidho.
- **Nooca galmada:** Soo jiidashada shucuureed iyo galmood ee qofka ee dadka kale.
- **Aqoonsiga jinsiga:** Dareenka gudaha ee qofka iyo jinsigooda, hadday tahay nin, naag, midna, labadaba ama wax kale.
- **Jinsiga uu ku dhashay ruuxu:** Jinsiga (lab ama dheddig) ee loo qoondeeyay dhallaanka marka ay dhashaan, inta badan waxay ku saleysan yihiin dabeecadaha jireed iyo kuwa kale ee bayooloji ee ilmaha.
- **Xaalad naafonimo:** Haddii qofku leeyahay naafo jireed ama maskaxeed taas oo ku adkeynaysa

inay sameeyaan waxqabadyada qaarkood iyo/ama la macaamilaan adduunka ku hareeraysan.

- **Kaxeyeyaasha bulshada ee caafimaadka:** Arrimaha aan caafimaadka ahayn ee saameeya caafimaadka qofka sida meesha uu ku dhashay, ku nool yahay, wax ka baranayo, shaqada, ciyaarta, cibaadada iyo da'da.

**S: Maxaad u weydiinaysaan macluumaadkan**

**J:** Waxaan u weydiinaa dhammaan bukaannada su'aalahan si aan u hubinno inaan bixinno daryeel ku habboon, loo dhan yahay oo tayo sare u leh qof kasta oo aan u adeegno. Jawaabahaagu waxey nag caawiyaan:

- **Ku siinta daryeelka ugu fiican.** Hadba intey kooxdaada daryeelkaaga ku garanayaan, ayey u badantahay iney dabooli karaan baahiyahaaga gaarka ah. Tusaale ahaan, haddii aad ku hadasho luqad aan Ingiriisi ahayn, waxay kuu diyaarin karaan turjubaan.
- **Yareyn faraqa u dhexeeya daryeelka caafimaadka.** Macluumaadkaagu wuxuu naga caawiyaa inaanu aqoonsanno isbeddellada iyo fursadaha horumarinta dhammaan kooxaha bukaannada. Tani waxay naga caawin doontaa horumarinta tayada guud ee adeegyadeena.
- **Buuxin shuruudaha gobolka iyo sharciyeynta.** Sharcigu waxa uu nooga baahan yahay in aanu bukaanka waydiino macluumaadkooda tirakoobka. Macluumaadkaagu waa mid gaar ah, sir ah oo sharcigu ilaalinayo. Kaliya kooxdaada daryeelka iyo shaqsiyaadka idman ayaa heli kara diiwaanka caafimaadkaaga.

**S: Yaa arki doona macluumaadkayga?**

**J:** Macluumaadkaagu waa mid gaar ah, sir ah oo sharcigu ilaalinayo. Kaliya kooxdaada daryeelka iyo shaqsiyaadka idman ayaa heli kara diiwaanka caafimaadkaaga.

**S: Maxaa dhacaya haddii aanan rabin inaan ka jawaabo mid ka mid ah su'aalahan?**

**J:** Uma baahnid inaad ka jawaabto su'aal kasta oo aadan rabin inaad ka jawaabto. Bixinta mid ka mid ah macluumaadkan waa ikhtiyaari. Waan ku waydiinaa sababtoo ah waanu danaynaynaa oo hadba intaan ku garaneyno, ayey u badantahay inaan ku daryeelno.

**S: Maxaa dhacaya haddii aan beddelo maskaxdayda ku saabsan wadaaga macluumaadkayga?**

**J:** Waxaad cusbooneysiin kartaa ama ka saari kartaa macluumaadkaaga wakhti kasta MyChart oo hoos yimaada astaantaada gaarka ah. Si aad isu diiwaangeliso ama aad u gasho MyChart, booqo **FredHutch.org/MyChart**. Haddii aadan haysan MyChart, u sheeg kooxdaada daryeelka waxayna kuu cusbooneysiin doonaan macluumaadkaaga.

**S: Sidee macluumaadkayga loo ilaaliyaa?**

**A:** Dhammaan aqoonsiga qofka iyo macluumaadka caafimaadka shakhsi ahaaneed waxaa ilaaliya Sharciga Qaadista iyo La Xisaabtanka Caymiska Caafimaadka (Health Insurance Portability and Accountability Act, HIPAA).

**Wixii macluumaad dheeraad ah**
**Iimayl: healthequity@fredhutch.org**